



Providence Medicare Advantage Plans Dual Plus + Rx (HMO D-SNP) Liiska Daawooyinka Caymisku Daboolo 2026 (Liiska Daawooyinka La Daboolo ama “Liiska Daawooyinka”)

**FADLAN AKHRI: DUKUMIINTIGAN WAXA KU QORAN MACLUUMAAD KU
SAABSAN DAAWOYINKA AAN KU DABOOLNO GUDAHA QORSHAHAN**

Aqoonsiga Liiska Daawooyinka Caymisku Daboolo: 00026069

Liiskan daawooyinka caymisku daboolo waxaa la cusboonaysiiyay taariikhda 09/02/2025.

Haddii aad qabto wax su'aalo ah, fadlan ka wac Providence Medicare Advantage Plans lambarka 503-574-8000 ama 1-800-603-2340. Isticmaalayaasha TTY waa inay wacaan 711. Waxaan furnahay toddoba maalmood usbuucii, inta u dhaxaysa 8 subaxnimo iyo 8 galabnimo (Waqtiga Baasifigga). Inta u dhaxaysa 1da Abriil ilaa 30ka Sebteembar waxaanu xirannahay Sabti iyo Axad kasta, ama booqo [ProvidenceHealthAssurance.com](https://www.ProvidenceHealthAssurance.com).

PROVIDENCE MEDICARE ADVANTAGE PLANS

DUAL PLUS + RX (HMO D-SNP)

Liiska Daawooyinka La daboolo ee 2026

(Liiska Daawooyinka Caymiska Daboolo ama “Liiska Daawooyinka”)

Eysiis ku socda xubnaha sii jiray: Liiskan daawooyinka caymiska daboolo ayaa is-beddelay tan iyo sannadkii hore. Fadlan dib u eeg dukumeentigan si aad u hubiso iney weli ku jiraan daawooyinka aad qaadato.

Marka Liiskan Daawooyinka (formulary) uu tilmaamayo “annaga,” “na,” ama “keenna,” waxaa loola jeedaa Providence Health Assurance. Marka la isticmaalo erayga “qorshaha” ama “qorshaheenna,” waxaa loola jeedaa Providence Medicare Dual Plus + Rx (HMO D-SNP).

Dukumeentigan waxaa ka mid ah Liiska Daawooyinka (formulary) ee qorshaheena kaas oo shaqaynaya laga bilaabo 09/2025. Si aad u hesho Liiska Daawooyinka (formulary) ee la cusboonaysiiyay, fadlan nala soo xiriir. Macluumaadkayaga xiriirka, oo uuna la socdo taariikhda ugu dambaysay ee aan cusboonaysiinay Liiska Daawooyinka (formulary), waxay ku qoran yihiin bogagga hore iyo ka dambe ee jeldiga.

Guud ahaan waa inaad isticmaashaa farmashiyeyaasha ku jira shabakadda si aad u isticmaasho dheeftaada daawooyinka dhakhtarku qoro. Dheefaha, liiska daawooyinka caymisku daboolo, shabakadda farmashiyaha, iyo/ama khidmadda caymiska ee go'an/camis-wadaag boqolley ayaa laga yaabaa iney isbeddelaan markey tahay Janaayo 1, 2027, iyo wakhti ka wakhti inta lagu jiro sanadka.

Waa maxay liiska daawooyinka caymisku daboolo ee Providence Medicare Advantage Plans Dual Plus + Rx (HMO D-SNP)?

Gudaha dukumeentigan, waxaan u isticmaalnaa ereyada Liiska Daawooyinka iyo ereyga "formulary" waxaan u isticmaalnaa si loogu macneeyo wax isku mid ah. Liiska daawooyinka caymisku daboolo (formulary) waa liis daawooyin caymiska lagu daboolayo oo ay soo xushey Providence Medicare Dual Plus + Rx (HMO D-SNP) iyadoo lala tashaday kooxda bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka. Liiskani waxa uu ka tarjumayaa daawooyinka dhakhtarka kuu qorayo ee loo arko inay qayb muhiim ah ka yihiin barnaamijka daawaynta tayada leh. Providence Medicare Dual Plus + Rx (HMO D-SNP) ayaa guud ahaan waxa uu daboolayaa daawooyinka ku jira liiska daawooyinka caymisku daboolo (formulary) haddii daawadaasi lagama maarmaan u tahay caafimaad ahaan, daawo qorista dhaktareed ee laga buuxiyo farmashiyaha ku jira shabakadda Providence Medicare Dual Plus + Rx (HMO D-SNP), iyo haddii sidoo kale lagu dhaqmo xeerarka kale ee qorshaha. Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida loo buuxiyo daawooyinka lagu qoray, fadlan dib u eeg Caddeyntaada Caymiska.

Ma isbeddeli karaa Liiska Daawooyinka Caymisku Daboolo?

Isbeddellada ugu badan ee ku yimaada caymiska daawooyinka waxay dhacaan Janaayo 1, laakiin Providence Medicare Dual Plus + Rx (HMO D-SNP) waxa uu sannad gudahiisa ku dari karaa ama ka saari karaa daawooyinka liiska daawooyinka caymisku daboolo (formulary), waxa uu u wareejin karaa heerar kharash-wadaag oo kala duwan, ama uu ku dari karaa xannibaado cusub. Waa inaan raacnaa xeerarka Medicare marka aan sameyneyno isbeddelladan. Cusboonaysiinta liiska daawooyinka caymisku daboolo (formulary) waxaa bil kasta lagu daabacaa boggayaga internetka: www.ProvidenceHealthAssurance.com/formulary

Isbeddellada ku saamayn kara sannadkan: Xaaladaha hoose ee soo socda, waxaa ku saameyn doonaa isbeddellada caymiska ee imaanaya inta lagu jiro sannadka gudihiisa:

- **Beddelida degdegga ah ee lagu sameeyo noocyada cusub ee daawooyinka magac-ganacsiga leh iyo daawooyinka bayooloji ah ee asaliga ah.** Waxaan isla markiiba ka saari karnaa daawo liiskeena daawooyinka caymisku daboolo haddii aan ku beddelayno nooc cusub oo gaar ah oo daawadaas ah, kaasoo ka muuqan doona isla heerka kharash-wadaagga ama mid ka hooseeya, isla markaana leh xannibaad isku mid ah ama kuwo ka yar. Marka aan ku darno liiskeena daawooyinka caymisku daboolo nooc cusub oo daawo ah, waxaan go'aansan karnaa inaan ku sii haysano daawada magac-ganacsiga leh ama daawada bayooloji ah ee asalka ah liiskeena daawooyinka caymisku daboolo, balse isla markiiba waxaanu u wareejinaa heer kale oo kharash-wadaag ah ama waxaan ku darnaa xannibaadyo cusub.

Waxaan samayn karnaa isbeddelladan degdegga ah oo keliya haddii aan ku darayno nooc cusub oo daawo guud ah oo magac–ganacsi leh ama aan ku darayno noocyo cusub oo daawooyin bayooloji ah oo la mid ah kuwaas oo ka mid ah badeecadda bayoolojiyeed ee asalka ah oo hore ugu jirtay liiska daawooyinka caymisku daboolo (tusaale ahaan, ku darista daawo bayooloji ah oo la mid ah oo la isku bedeli karo taas oo farmashiyadu ku beddeli karto badeecadda bayoolojiyeed ee asalka ah iyada oo aan loo baahnayn daawooyin lagu qoray oo cusub).

Haddii aad hadda qaadanayso daawada magac–ganacsi leh ama badeecadda bayoolojiyeed ee asalka ah, waxaa dhici karta inaanaan kuu sheegin horay ka hor inta aanan samayn isbeddel degdeg ah, balse waxaan markaa ka dib ku siin doonnaa macluumaad ku saabsan isbeddelka (lada) gaar ah ee aan sameynay.

Haddii aan samayno isbeddel noocaas ah, adiga ama dhakhtarka kuu qoray daawada waxaad naga codsan kartaa in aan sameyno ka-reebis oo aan sii wadno daboolidda daawada la beddelaayo. Wixii macluumaad dheeraad ah, eeg qaybta cinwaankeedu yahay “Sideen uga codsan karaa ka-reebitaan Liiska Daawooyinka Caymisku Daboolo (Formulary) ee Providence Medicare Dual Plus + Rx (HMO D-SNP)?”

Qaar ka mid ah noocyadan daawooyinka ayaa laga yaabaa inay kugu cusub yihiin. Wixii macluumaad dheeraad ah, eeg qaybta hoose ee cinwaankeedu yahay “Waa maxay badeecadaha bayoolojiyeed ee asalka ah iyo sidee ayay xiriir ula leeyihiin daawooyinka bayooloji ah ee la midka ah?”

- **Daawooyinka laga saaray suuqa.** Haddii daawo uu kala noqdo iibinta soo saaraha ama haddii Maamulka Cuntada iyo Dawooyinka (Food and Drug Administration, FDA) uu go’aamiyo in la joojiyo sababo la xiriira badbaado ama waxtar la’aan, waxaan isla markiiba ka saari karnaa daawada liiska daawooyinka caymisku daboolo waxaana mar dambe siin doonnaa ogeysiis xubnaha qaata daawadaas.
- **Isbeddellada kale.** Waxaan samayn karnaa isbeddello kale oo saameynaya xubnaha hadda qaadanaya daawo. Tusaale ahaan, waxaan ka saari karnaa daawo magac–ganacsi leh liiska daawooyinka caymisku daboolo markaan ku dareyno magac guud oo u dhigma ama waxaa meesha ka saari karnaa badeecadda bayoolojiyeed ee asalka ah marka aan ku soo dareyno daawo bayooloji ah oo la midka ah. Waxaan sidoo kale ku dabaqi karnaa xannibaado cusub daawada magac–ganacsi leh ama badeecadda bayoolojiyeed ee asalka ah, ama waxaan u wareejin karnaa heer kale oo kharash-wadaag ah, ama labadaba waan ku dabaqi karnaa. Waxaan samayn karnaa isbeddello ku salaysan tilmaamaha cusub ee caafimaadka. Haddii aan ka saarno daawooyinka liiskeena dawooyinka caymisku daboolo, aan ku darno oggolaansho hore, xaddidaadyo tiro ah iyo/ama xaddidaadyada isku dayida daawada marka hore, ama aan u wareejinno daawo heer sare oo kharash-wadaag ah, waa in aan ku

ogeysiinaa xubnaha uu isbeddelku saameeyay ugu yaraan 30 maalmood ka hor inta aanu isbeddelku dhaqan gelin. Taa beddelkeeda, marka xubin codsato buuxinta daawada, waxaa laga yaabaa inay ka helaan sahay daawo oo ay isticmaalaan 30-maalmood dukaanka tafaariiqda ama adeegga boostada ku dalbashada ama 31-maalmood oo sahay daawo ah xarunta daryeelka muddada-dheer (long-term care, LTC) iyo ogeysiiska ku saabsan isbeddelka.

Haddii aan samayno isbeddelladan kale, adiga ama dhakhtarka kuu qoray daawada waxaad naga codsan kartaa in aan sameyno ka-reebis oo aan sii wadno daboolidda daawada aad qaadanaysay. Ogeysiiska aan ku siinayno waxa kale oo ku jiri doona macluumaad ku saabsan sida loo codsado ka-reebitaan, waxaadna sidoo kale ka heli kartaa macluumaad qaybta hoose ee cinwaankeedu yahay “Sideen uga codsan karaa ka-reebitaan Liiska Daawooyinka Caymisku Daboolo (Formulary) ee Providence Medicare Dual Plus + Rx (HMO D-SNP)?”

Isbeddellada aan ku saameyn doonin haddii aad hadda qaadanayso daawada.

Guud ahaan, haddii aad qaadanayso daawo ku jirta liiskeena daawooyinka uu caymisku daboolo ee 2026 oo la daboolay bilowga sanadka, ma joojin doonno ama ma dhimayno daboolidda daawada inta lagu jiro sanadka daboolidda ee 2026, marka laga reebo sida kor ku xusan. Tani waxay ka dhigan tahay in daawooyinkan ay sii ahaan doonaan kuwo la heli karo isla heerka kharash-wadaagga ee hadda jira, iyada oo aan lagu darin xannibaado cusub, dhammaan xubnaha hadda qaadanaya ilaa dhammaadka sanadka caymiska. Sanadkan ma heli doontid ogeysiis toos ah oo ku saabsan isbeddellada aan ku saameynaynin. Si kastaba ha ahaatee, 1 Janaayo ee sanadka soo socda, isbeddellada noocyadaas ah ayaa ku saameyn doona, waana muhiim inaad eego Liiska Daawooyinka Caymisku Daboolo ee dheefta sannadka cusub si aad u aragto wixii isbeddel ah ee ku imaaday daawooyinka.

Liiska daawooyinka caymisku daboolo ee ku lifaaqan waa midka hadda jira laga bilaabo 09/2025. Si aad u hesho macluumaad cusub oo ku saabsan daawooyinka uu daboolo Providence Medicare Dual Plus + Rx (HMO D-SNP), fadlan nala soo xiriir. Macluumaadkeena xidhiidhku waxa uu ku qoran yahay bogga jeldiga hore iyo kan danbe. Haddii ay dhacaan isbeddello ku yimaada liiska daawooyinka uu caymisku daboolo inta lagu jiro sanadka ee aan ahayn kuwa joogtada ah waxaan kuugu soo sheegi doonaa isbeddelladaas iyada oo la soo maraayo Sharaxaadda Dheefaha (Explanation of Benefits, EOBs) ama warqad sixid.

Sideen u isticmaalaa Liiska Daawooyinka Caymisku Daboolo?

Waxaa jira laba hab oo aad uga heli karto daawadaada gudaha liiska daawooyinka caymisku daboolo:

Xaalada Caafimaadka

Liiska daawooyinka caymisku daboolo wuxuu ka bilaabmaa bogga 3. Daawooyinka ku jira liiska daawooyinka caymisku daboolo waxaa loo qaybiyey qaybo iyadoo lagu saleynayo nooca xaaladaha caafimaad ee lagu daweeyo. Tusaale ahaan, daawooyinka loo isticmaalo daaweynta xaaladaha wadnaha waxaa lagu taxay

qaybta loo yaqaanno “Cardiovascular Agents (Daawooyinka Wadnaha iyo Halbowlayaasha Dhiiga). Haddii aad ogtahay waxa daawadaada loo isticmaalo, ka raadi magaca qaybta gudaha liiska ka bilaabmaya bogga 1. Kadib, hoos ka eeg magaca qaybta si aad u hesho daawadaada.

Liiska Alifbeeto Ahaanta Ku Qoran

Haddii aadan hubin qaybta aad ka eegi lahayd, waa inaad ka raadisaa daawadaada Tasmada ka bilaabmaya bogga 120. Tasmada waxay ku siinaysaa liis alifbeeto oo ah dhammaan daawooyinka ku jira dukumeentigan. Tasmada waxaa ku taxan daawooyinka magac-ganacsi leh iyo daawooyinka guud labadaba. Eeg Tasmada oo ka hel daawadaada. Xaga xigta daawadaada, waxaad ka arki doontaa lambarka bogga ee aad ka heli karto macluumaadka caymiska. U gudub bogga ku qoran Tasmada oo ka hel magaca daawadaada tiirka koowaad ee liiska.

Waa maxay daawooyinka guud?

Providence Medicare Dual Plus + Rx (HMO D-SNP) waxa uu daboolaa daawooyinka magac-ganacsi leh iyo daawooyinka guud labadaba. Daawada guud waxaa ansixiyay FDA iyadoo loo aqoonsaday inay leedahay isla walaxda daawada ee ugu muhiimsan ee ku jirta daawada magaca-ganacsiga leh. Guud ahaan, daawooyinka guud waxay u shaqeeyaan si la mid ah daawooyinka magac-ganacsi leh, kharashkoodana wuu ka jaban yahay. Waxaa jira daawooyin guud oo lagu beddeli karo daawooyin badan oo magac-ganacsi leh. Daawooyinka guud badanaa waxaa lagu beddelaa daawada magac-ganacsiga leh ee aad hore u qaadanaysay marka aad farmashiyaha tagto adigoo oo aanan u baahanin daawo qoris dhakhtar oo cusub, balse waxay ku xirnaan doontaa shuruucda gobolka aad ku nooshahay.

Waa maxay badeecadaha bayolojiyeed ee asalka ah, sideese ayey ula xiriiraan daawooyinka bayoloji ee la midka ah?

Gudaha liiska daawooyinka marka aan ka hadlayno daawooyinka, waxay noqon kartaa daawo ama badeecad bayoloji ah. Badeecadaha bayolojiiga ah waa daawooyin ka adag kuwa caadiga ah. Maadaama badeecadaha bayolojiiga ahi ay ka adag yihiin daawooyinka caadiga ah, halkii ay ka yeelan lahaayeen nooc guud, waxay leeyihiin beddelaad loo yaqaan daawooyin bayoloji ah oo la mid ah. Guud ahaan, daawooyinka bayolojiyeed ee la midka ah waxay u shaqeeyaan si la mid ah badeecadda bayolojiyeed ee asalka ah, kharashkooduna laga yaabo inuu ka jaban yahay. Waxaa jira daawooyin bayolojiyeed oo la mid ah oo lagu beddeli karo qaar ka mid ah badeecadaha bayolojiyeed ee asalka ah. Qaar ka mid ah daawooyinka bayolojiyeed ee la midka ah waa kuwo la isu beddeli karo oo, waxaana looga beddeli karaa badeecadda bayolojiyeed ee asalka ah farmashiyaha iyadoo aan loo baahnayn warqad daawo cusub oo uu qoray dhakhtarkaaga, sida uun daawooyinka guud loogu beddelo daawooyinka magac-ganacsiga leh.

- Si aad u hesho faahfaahin ku saabsan noocyada daawooyinka, fadlan ka eeg Caddeynta Caymiska, Cutubka 5, Qaybta 3.1, “Liiska Daawooyinka Caymisku Daboolo' wuxuu muujinayaa daawooyinka Part D ee uu caymisku daboolo.”

Ma jiraan xaddidaadyo ku aadan caymiskeyga?

Qaar ka mid ah daawooyinka caymiska lagu daboolo ayaa laga yaabaa inay yeeshaan shuruudo dheeraad ah ama xaddidaadyo ku aadan caymiska. Shuruudahan iyo xaddidaadyadani waxay ka koobnaan karaan:

- **Oggolaansho Hore:** Providence Medicare Dual Plus + Rx (HMO D-SNP) waxa uu kaa doonayaa adiga ama dhakhtarkaaga in aad heshid oggolaansho hore kahor inta aan la daboolin daawooyin gaar ah. Tani waxay ka dhigan tahay in aad u baahan tahay in aad oggolaansho ka hesho Providence Medicare Dual Plus + Rx (HMO D-SNP) kahor inta aadan buuxin daawooyinkaada uu dhakhtarku kuu qoray. Haddii aanad helin oggolaansho hore, Providence Medicare Dual Plus + Rx (HMO D-SNP) lagama yaabo iney daboosho daawada.
- **Xaddidaadda Qadarka:** Daawooyinka qaarkood, Providence Medicare Dual Plus + Rx (HMO D-SNP) waxa uu oggolaanayaa oo keliya in lagu daboolo qadar go'an oo daawada ah. Tusaale ahaan, Providence Medicare Dual Plus + Rx (HMO D-SNP) waxa uu ka daboolaa 2 kaniini maalintii halkii daawo qoris dhakhtareed ee Xtampza ER®. Tani waxay ka dhigan tahay in tani ay ku dari karto qiyaasta caadiga ah ee hal bil ama saddex bil oo daawo ah ee aad caadi ahaan hesho.
- **Isku Dayida Adeegsiga Hal Daawo Marka Hore:** Xaaladaha qaarkood, Providence Medicare Dual Plus + Rx (HMO D-SNP) waxa uu kaa doonayaa inaad marka hore isticmaasho daawooyin gaar ah si loogu daaweeyo xaaladdaada caafimaad. Haddii daawooyinkaas aysan waxtar lahayn, qorshuhu markaas ayuu daboolayaa kharashka daawo kale oo loogu talagalay xaaladdaas. Tusaale ahaan, haddii Daawo A iyo Daawo B labaduba loo isticmaalo in lagu daaweeyo xaaladdaada caafimaad, waxaa dhici karta in Providence Medicare Dual Plus + Rx (HMO D-SNP) aanu daboolin kharashka Daawo B ilaa aad marka hore isticmaasho Daawo A. Haddii Daawo A aanay ku waxtar lahayn, Providence Medicare Dual Plus + Rx (HMO D-SNP) wuxuu markaas daboolayaa kharashka Daawo B.

Waxaad ogaan kartaa haddii daawadaada ay leedahay shuruudo ama xaddidaadyo dheeraad ah adiga oo ka eegaya liiska daawooyinka caymisku daboolo ee ka bilaabmanaya bogga 3. Waxaad sidoo kale ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xayiraadaha lagu dabaqay daawooyinka caymiska lagu daboolo ee gaarka ah adiga oo booqanaya websaydkeena. Waxaan onlayn ku soo boosti-gareynay dukumeenti sharxaya xayiraadaha oggolaanshaheena hore iyo xaddidaadda isku dayida marka hore adeegsiga hal daawo. Waxaad sidoo kale naga codsan kartaa inaan

kuu soo dirno nuqul. Macluumaadkeena xiriirka, iyo sidoo kale taariikhda aan ugu dambeyntii cusbooneysiinay liiska daawooyinka caymisku daboolo, waxay ku qoran yihiin bogagga hore iyo kan dambe ee jeldiga buugga.

Waxaad ka codsan kartaa Providence Medicare Dual Plus + Rx (HMO D-SNP) in laga sameeyo ka-reebis xayiraadahan ama xaddidaadahan, ama lagu diyaariyo liis daawooyin kale oo la mid ah oo laga yaabo inay kaa caawiyaan daaweynta xaaladdaada caafimaad. Eeg qaybta “Sideen uga codsan karaa ka-reebis liiska daawooyinka caymisku daboolo (formulary) ee Providence Medicare Advantage Plans Dual Plus + Rx (HMO D-SNP)” ee bogga viii si aad u hesho macluumaad ku saabsan sida loo codsado ka-reebis.

Ka waran haddii daawadeydu aysan ku jirin Liiska Daawooyinka Caymisku Daboolo (Formulary)?

Haddii daawadaada aan lagu darin liiskan daawooyinka caymisku daboolo (liiska daawooyinka caymiska lagu daboolo), waa inaad marka hore la xiriirtaa Adeegyada Macaamiisha oo aad weydiisaa haddii daawadaada la daboolo.

Haddii aad ogaato in Providence Medicare Dual Plus + Rx (HMO D-SNP) aanu daboolin daawadaada, waxaad haysataa laba doorasho:

- Waxaad ka codsan kartaa Adeegyada Xubnaha liis daawooyin la mid ah oo ay daboolayso Providence Medicare Dual Plus + Rx (HMO D-SNP). Markaad hesho liiska, tusi dhakhtarkaaga oo weydii inuu kuu qoro daawo kale oo la mid ah oo ay daboolayso Providence Medicare Dual Plus + Rx (HMO D-SNP).
- Waxaad ka codsan kartaa Providence Medicare Dual Plus + Rx (HMO D-SNP) in laga sameeyo ka-reebis oo lagu daboolo daawadaada. Eeg hoos si aad u hesho macluumaad ku saabsan sida looga codsado ka-reebitaan.

Sideen uga codsan karaa ka-reebis Liiska Daawooyinka Caymisku Daboolo (Formulary) ee Qorshaha Providence Medicare Advantage Plans Dual Plus + Rx (HMO D-SNP)?

Waxaad ka codsan kartaa Providence Medicare Dual Plus + Rx (HMO D-SNP) in lagu sameeyo ka-reebis xeerarkeena caymiska ee daboolista. Waxaa jira dhowr nooc oo ka-reebis ah oo aad naga codsan karto inaan sameyno.

- Waad naga codsan kartaa inaan daboolno daawo xitaa haddii aysan ku jirin liiska daawooyinka caymisku daboolo. Haddii la oggolaado, daawadan waxaa lagu dabooli doonaa heerka kharash-wadaag ah ee horeyba loo sii go'aamiyay, mana awoodi doontid inaad naga codsato in aan kugu siino daawada heer kharash-wadaag oo ka hooseeya kaas.

- Waxaad naga codsan kartaa inaan kaa dhaafno xaddidaadda caymiska oo ay ku jiraan oggolaansho hore, xaddidaadda isku dayida adeegsiga marka hore hal daawo, ama xaddidaadda qadarka ee daawadaada. Tusaale ahaan, daawooyinka qaarkood, Providence Medicare Dual Plus + Rx (HMO D-SNP) waxa uu xadidayaa qadarka daawada ee qorshuhu daboolayo. Haddii daawadaadu ay leedahay xaddidaad qadar, waxaad naga codsan kartaa inaan kaa dhaafno xaddidaadda oo aan daboolno qadar intaa ka badan.

Guud ahaan, Providence Medicare Dual Plus + Rx (HMO D-SNP) waxa uu oggolaanayaa codsigaaga ka-reebis oo keliya haddii daawooyinka kale ee ku jira liiska daawooyinka caymisku daboolo ee qorshaha ama kugu dabaqitaanka xayiraaduhu aysan kuu noqoneynin mid waxtar kuu leh oo/ama ay kuu horseedi karaan dhibaatooyin caafimaad oo xun.

Adiga ama dhakhtarka kuu qoray daawada waa inaad nala soo xiriirtaan si aad uga codsataan ka-reebis liiska daawooyinka caymisku daboolo, oo ay ku jirto ka-reebis ku saabsan xeerarka caymiska ee daboolista. ***Markaad codsato ka-reebitaan, dhakhtarka kuu qoray daawada ayaa u baahan doona inuu sharaxo sababaha caafimaad ee aad ugu baahan tahay ka-reebitanka.*** Guud ahaan, waa inaan go'aankeenna ku gaarnaa 72 saacadood gudahood marka aan helno qoraalka taageerada ee dhakhtarka kuu qoray daawada. Waxaad codsan kartaa go'aan degdeg ah (dhaqso ah) haddii aad aaminsan tahay, annaguna aan kugu waafaqno, in caafimaadkaaga si daran waxyeello loogu geysan karo haddii aad sii sugto ilaa 72 saacadood go'aanka. Haddii aan kugu waafaqno, ama dhakhtarkaaga kuu qoray daawada uu codsado go'aan degdeg ah, waa inaan ku siinnaa go'aan ugu dambayn 24 saacadood gudahood ka dib marka aan helno qoraalka taageerada ee dhakhtarkaaga.

Maxaan samayn karaa haddii daawadaydu aysan ku jirin liiska daawooyinka caymisku daboolo ama ay leedahay xaddidaad?

Maadaama aad tahay xubin cusub ama mid ku sii jira qorshaheenna, waxaa laga yaabaa inaad qaadanayso daawooyin aan ku jirin liiskeena daawooyinka uu caymisku daboolo. Ama waxaa laga yaabaa inaad qaadanayso daawo ku jirta liiskeena daawooyinka caymisku daboolo laakiin leh xannibaad caymis, sida oggolaansho hore. Waa inaad kala hadashaa dhakhtarkaaga daawada kuusoo qoray wax ku saabsan codsashada go'aan caymis daboolid si loo caddeeyo inaad buuxisay shuruudaha oggolaanshaha, in aad u bedelato daawo kale oo aanu daboolno, ama in aad codsato ka-reebitaanka liiska daawooyinka caymisku daboolo si aanu u daboolno daawada aad qaadata. Inta aad adiga iyo dhakhtarkaaga ka go'aaminaysaan daawada kugu habboon, qorshaheennu wuxuu mararka qaarkood dabooli karaa daawadaada 90 maalmood ee ugu horreeya ee aad xubin ka tahay qorshaheena.

Daawo kasta oo aad qaadata oo aan ku jirin liiskeena daawooyinka caymisku daboolo ama leh xaddidaad caymis, waxaan ku dabooli doonaa sahay ku-meelgaar ah oo dhan 30 maalmood. Haddii daawo qoristaada dhakhtarku tahay sahay kugu filan maalmo dhawr ah, waxaan kuu oggolaan doonaa in lagu buuxiyo daawada marar badan ilaa aad ka hesho ugu badnaan sahay 30-maalmood oo daawo ah. Haddii caymiska aan la oggolaan, ka dib markii aad heshid sahaydaada ugu horreysa ee 30-maalmood ah, qorshuhu ma dabooli doono daawooyinkan, xitaa haddii aad xubin ka ahayd qorshaha wax ka yar 90 maalmood.

Haddii aad ku nooshahay xarun daryeel muddo-dheer ah oo aad u baahan tahay daawo aan ku jirin liiskeena daawooyinka caymisku daboolo ama helitaanka daawooyinkaaga uu xaddidan yahay, laakiin aad dhaaftay 90-kii maalmood ee ugu horreeyay ee xubinnimada qorshaha, waxaan dabooli doonaa sahay degdeg ah oo 31 maalmood ah oo daawadaas ah inta aad ku jirto codsashada ka-reebitanka liiska daawooyinka caymisku daboolo.

Isbeddelka heerka daryeelka:

Xubnaha ka soo wareegayaan xarunta daryeelka kalkaalinta xirfada leh (Skilled Nursing Facility, SNF) una soo wareegayaan xarunta daryeelka muddada-dheer (Long-Term Care, LTC):

Laga soo wareejinayo xarunta daryeelka kalkaalinta xirfada leh (SNF) loona wareejinayo guriga (Farmashiyaha tafaariiqda):
LTC-LTC:

Laga soo wareejinayo isbitaalka loona wareejinayo guriga (Farmashiyaha tafaariiqda):

Maalinta Sahayda

waxaa la dabooli doonaa 31 maalmood sahay ah.

sahay 30 maalmood ah

sahay daawo oo 31 maalmood ah
sahay 30 maalmood ah

Wixii Macluumaad dheeraad ah

Si aad u hesho macluumaad faahfaahsan oo ku saabsan caymiska daawooyinka dhakhtarku qoro ee Providence Medicare Dual Plus + Rx (HMO D-SNP), fadlan dib u eeg Caddeyntaada Caymiska iyo agabyada kale ee qorshaha.

Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan Providence Medicare Dual Plus + Rx (HMO D-SNP) fadlan nala soo xiriir. Macluumaadkeena xiriirka, iyo sidoo kale taariikhda aan ugu dambeyntii cusbooneysiinay liiska daawooyinka caymisku daboolo, waxay ku qoran yihiin bogagga hore iyo kan dambe ee jeldiga buugga.

Haddii aad qabto su'aalo guud oo ku saabsan caymiska daawooyinka dhakhtarku qoro ee Medicare, fadlan ka wac Medicare lambarka 1-800-MEDICARE (1-800-633-4227), waa la heli karaa 24 saac maalintii/7 maalmood usbuucii. Isticmaalayaasha TTY waa inay wacaan 1-877-486-2048. Ama booqo <http://www.medicare.gov>.

Liiska Daawooyinka Caymisku Daboolo (Formulary) ee Providence Medicare Dual Plus + Rx (HMO D-SNP)

Liiska daawooyinka caymisku daboolo (formulary) ee ka bilaabmaya bogga 3 waxa uu bixiyaa macluumaad ku saabsan caymiska daawooyinka ay daboolayso Providence Medicare Dual Plus + Rx (HMO D-SNP). Haddii aad dhib kala kulanto ka helida daawadaada gudaha liiska, fadlan u gudub Tasmada oo ka bilaabmaysa bogga 120.

Safka koowaad ee jadwalka wuxuu taxayaa magaca daawada. Daawooyinka magac-ganacsi leh waxaa lagu qoray xarfo waaweyn (tusaale, JANUVIA®), halka daawooyinka guudna lagu qoro xarfo yaryar oo jiif ah (tusaale, *lisinopril*).

Macluumaadka ku jira tiirka Shuruudaha/Xaddidaadaha waxa uu ku tusayaa haddii Providence Medicare Dual Plus + Rx (HMO D-SNP) leeyahay shuruudo gaar ah oo lagu daboolo daawadaada.

Dokumentigan waxaa laga heli karaa ereyada la soo gaabiyay ee soo socdaan.

SOO GAABINTA ERAYADA QORAALADA CAYMISKA

SOO GAABINTA ERAYADA	SHARAXAADA	FAHFAAHINTA
Xaddidaadaha Maareynta Isticmaalka		
PA	Xaddidaadda Oggolaansho Hore	Adiga (ama dhakhtarkaaga) waxaa lagaa rabaa inaad heshaan oggolaansho hore oo ka socta Providence Medicare Dual Plus + Rx (HMO D-SNP) ka hor inta aanad buuxin daawada lagu qoray. Haddii aan la helin oggolaansho hore, Providence Medicare Dual Plus + Rx (HMO D-SNP) ayaa laga yaabaa inuusan daboolin daawadan.
QL	Xaddidaadda Qadarka Daawada	Providence Medicare Dual Plus + Rx (HMO D-SNP) waxa uu xadidaa qadarka daawadan ee lagu daboolayo hal daawo qoris dhakhtareed, ama muddo cayiman gudaheed.
ST	Xaddidaadda Isku-dayida Adeegsiga Hal Daawo Marka Hore	Ka hor inta aysan Providence Medicare Dual Plus + Rx (HMO D-SNP) daboolin daawadan, waa inaad marka hore qaadataa daawo kale oo lagu daaweeyo xaaladdaada caafimaad. Daawadan waxaa laga yaabaa in kaliya la daboolo haddii daawada kale aanay adiga kuu shaqayn.

SOO GAABINTA ERAYADA	SHARAXAADA	FAHFAAHINTA
Shuruudo Kale ee Gaar ah ee ku saabsan Caymis Daboolista		
LA	Helitaanka Xaddidan ee Daawada	Daawo qoristan dhakhtareed waxaa laga heli karaa oo keliya farmashiyo gaar ah. Haddii aad qabto wax su'aalo ah, fadlan ka wac Providence Medicare Advantage Plans lambarka 503-574-8000 ama 1-800-603-2340. Isticmaalayaasha TTY waa inay wacaan 711. Waxaan furnahay toddoba maalmood usbuucii, inta u dhaxaysa 8 subaxnimo iyo 8 galabnimo (Waqtiga Baasifigga). Inta u dhaxaysa 1da Abriil ilaa 30ka Sebteembar waxaanu xirannahay Sabti iyo Axad kasta. Ama booqo www.providencehealthassurance.com .

Notice of Availability of Language Assistance Services and Auxiliary Aids and Services

English

ATTENTION: If you speak English, free language assistance services are available to you. Appropriate auxiliary aids and services to provide information in accessible formats are also available free of charge. Call 1-800-603-2340 (TTY: 711) or speak to your provider.”

Español (Spanish)

ATENCIÓN: Si habla español, tiene a su disposición servicios gratuitos de asistencia lingüística. También están disponibles de forma gratuita ayuda y servicios auxiliares apropiados para proporcionar información en formatos accesibles. Llame al 1-800-603-2340 (TTY: 711) o hable con su proveedor.

Việt (Vietnamese)

LƯU Ý: Nếu bạn nói tiếng Việt, chúng tôi cung cấp miễn phí các dịch vụ hỗ trợ ngôn ngữ. Các hỗ trợ dịch vụ phù hợp để cung cấp thông tin theo các định dạng dễ tiếp cận cũng được cung cấp miễn phí. Vui lòng gọi theo số 1-800-603-2340 (Người khuyết tật: 711) hoặc trao đổi với người cung cấp dịch vụ của bạn.”

中文 (Chinese-Simplified)

注意：如果您说中文，我们将免费为您提供语言协助服务。我们还免费提供适当的辅助工具和服务，以无障碍格式提供信息。致电 1-800-603-2340（文本电话：711）或咨询您的服务提供商。”

中文 (Chinese- Traditional)

注意：如果您說中文，我們可以為您提供免費語言協助服務。也可以免費提供適當的輔助工具與服務，以無障礙格式提供資訊。請致電 1-800-603-2340（TTY：711）或與您的提供者討論。」

РУССКИЙ (Russian)

ВНИМАНИЕ: Если вы говорите на русский, вам доступны бесплатные услуги языковой поддержки. Соответствующие вспомогательные средства и услуги по предоставлению информации в доступных форматах также предоставляются бесплатно. Позвоните по телефону 1-800-603-2340 (TTY: 711) или обратитесь к своему поставщику услуг.

한국어 (Korean)

주의: 한국어를 사용하시는 경우 무료 언어 지원 서비스를 이용하실 수 있습니다. 이용 가능한 형식으로 정보를 제공하는 적절한 보조 기구 및 서비스도 무료로 제공됩니다. 1-800-603-2340 (TTY: 711)번으로 전화하거나 서비스 제공업체에 문의하십시오."

українська мова (Ukrainian)

УВАГА: Якщо ви розмовляєте українською мовою, вам доступні безкоштовні мовні послуги. Відповідні допоміжні засоби та послуги для надання інформації у доступних форматах також доступні безкоштовно. Зателефонуйте за номером 1-800-603-2340 (TTY: 711) або зверніться до свого постачальника».

日本語 (Japanese)

注: 日本語を話される場合、無料の言語支援サービスをご利用いただけます。アクセシブル(誰もが利用できるよう配慮された)な形式で情報を提供するための適切な補助支援やサービスも無料でご利用いただけます。1-800-603-2340 (TTY: 711)までお電話ください。または、ご利用の事業者にご相談ください。

(Arabic) العربية

تنبيه: إذا كنت تتحدث اللغة العربية، فستتوفر لك خدمات المساعدة اللغوية المجانية. كما تتوفر وسائل مساعدة وخدمات مناسبة لتوفير المعلومات بتنسيقات يمكن الوصول إليها مجانًا. اتصل على الرقم 1-800-603-2340 (711) أو تحدث إلى مقدم الخدمة".

ភាសាខ្មែរ (Khmer)

សូមយកចិត្តទុកដាក់: ប្រសិនបើអ្នកនិយាយ ភាសាខ្មែរ សេវាកម្មជំនួយភាសា ឥតគិតថ្លៃគឺមានសម្រាប់អ្នក។ ជំនួយ និងសេវាកម្មដែលជាការជួយដ៏សមរម្យ ក្នុងការផ្តល់ព័ត៌មានតាមទម្រង់ដែលអាចចូលប្រើប្រាស់បាន ក៏អាចរកបាន ដោយឥតគិតថ្លៃផងដែរ។ ហៅទូរសព្ទទៅ 1-800-603-2340 (TTY: 711) ឬនិយាយទៅកាន់អ្នកផ្តល់សេវារបស់អ្នក។"

Deutsch (German)

ACHTUNG: Wenn Sie Deutsch sprechen, stehen Ihnen kostenlose Sprachassistenzen zur Verfügung. Entsprechende Hilfsmittel und Dienste zur Bereitstellung von Informationen in barrierefreien Formaten stehen ebenfalls kostenlos zur Verfügung. Rufen Sie 1-800-603-2340 (TTY: 711) an oder sprechen Sie mit Ihrem Provider."

فارسي (Farsi)

توجه: اگر فارسي صحبت می کنید، خدمات پشتیبانی زبانی رایگان در دسترس شما قرار دارد. همچنین کمک ها و خدمات پشتیبانی مناسب برای ارائه اطلاعات در قالب های قابل دسترس، به طور رایگان موجود می باشند. با شماره 1-800-603-2340 (تله تایپ: 711) تماس بگیرید یا با ارائه دهنده خود صحبت کنید.

Français (French)

ATTENTION : Si vous parlez Français, des services d'assistance linguistique gratuits sont à votre disposition. Des aides et services auxiliaires appropriés pour fournir des informations dans des formats accessibles sont également disponibles gratuitement. Appelez le 1-800-603-2340 (TTY : 711) ou parlez à votre fournisseur. »

ไทย (Thai)

หมายเหตุ: หากคุณใช้ภาษา ไทย เรามีบริการความช่วยเหลือด้านภาษาฟรี นอกจากนี้ ยังมีเครื่องมือและบริการช่วยเหลือเพื่อให้ข้อมูลในรูปแบบที่เข้าถึงได้โดยไม่เสียค่าใช้จ่าย โปรดโทรติดต่อ 1-800-603-2340 (TTY: 711) หรือปรึกษาผู้ให้บริการของคุณ”

Tagalog

PAALALA: Kung nagsasalita ka ng Tagalog, magagamit mo ang mga libreng serbisyonang tulong sa wika. Magagamit din nang libre ang mga naaangkop na auxiliary na tulong at serbisyo upang magbigay ng impormasyon sa mga naa-access na format. Tumawag sa 1-800-603-2340 (TTY: 711) o makipag-usap sa iyong provider.”

አማርኛ (Amharic)

ማሳሰቢያ:- አማርኛ የሚናገሩ ከሆነ፣ የቋንቋ ድጋፍ አገልግሎት በነፃ ይቀርብልዎታል። መረጃን በተደራሽ ቅርጸት ለማቅረብ ተገቢ የሆኑ ተጨማሪ እገዛዎች እና አገልግሎቶች እንዲሁ በነፃ ይገኛሉ። በስልክ ቁጥር 1-800-603-2340 (TTY: 711) ይደውሉ ወይም አገልግሎት አቅራቢዎን ያናግሩ።”

ਪੰਜਾਬੀ (Punjabi)

ਧਿਆਨ ਦਿਓ: ਜੇ ਤੁਸੀਂ ਪੰਜਾਬੀ ਬੋਲਦੇ ਹੋ, ਤਾਂ ਤੁਹਾਡੇ ਲਈ ਮੁਫਤ ਭਾਸ਼ਾ ਸਹਾਇਤਾ ਸੇਵਾਵਾਂ ਉਪਲਬਧ ਹੁੰਦੀਆਂ ਹਨ। ਪਹੁੰਚਯੋਗ ਫਾਰਮੈਟਾਂ ਵਿੱਚ ਜਾਣਕਾਰੀ ਪ੍ਰਦਾਨ ਕਰਨ ਲਈ ਢੁਕਵੇਂ ਪੂਰਕ ਸਹਾਇਕ ਸਾਧਨ ਅਤੇ ਸੇਵਾਵਾਂ ਵੀ ਮੁਫਤ ਵਿੱਚ ਉਪਲਬਧ ਹੁੰਦੀਆਂ ਹਨ। 1-800-603-2340 (TTY: 711) 'ਤੇ ਕਾਲ ਕਰੋ ਜਾਂ ਆਪਣੇ ਪ੍ਰਦਾਤਾ ਨਾਲ ਗੱਲ ਕਰੋ।”

ລາວ (Laos)

ເຊີນຊາບ: ຖ້າທ່ານເວົ້າພາສາ ລາວ, ຈະມີບໍລິການຊ່ວຍດ້ານພາສາແບບບໍ່ເສຍຄ່າໃຫ້ທ່ານ. ມີເຄື່ອງຊ່ວຍ ແລະ

ການບໍລິການແບບບໍ່ເສຍຄ່າທີ່ເໝາະສົມເພື່ອໃຫ້ຂໍ້ມູນໃນຮູບແບບທີ່ສາມາດເຂົ້າເຖິງໄດ້. ໂທຫາເບີ 1-800-603-2340 (TTY: 711) ຫຼື ລົມກັບຜູ້ໃຫ້ບໍລິການຂອງທ່ານ."

ՀԱՅԵՐԵՆ (Armenian)

ՈՒՇԱԴՐՈՒԹՅՈՒՆ. Եթե խոսում եք հայերեն, Դուք կարող եք օգտվել լեզվակալն անվճար ծառայություններից: Մատչելի ձևաչափերով տեղեկատվություն տրամադրվում է համապատասխան օժանդակ միջոցներն ու ծառայությունները նույնպես տրամադրվում են անվճար: Չանգահարեք 1-800-603-2340 հեռախոսահամարով (TTY` 711) կամ խոսեք Ձեր մատակարարի հետ:

Lus Hmoob (Hmong)

LUS CEEV TSHWJ XEEB: Yog hais tias koj hais Lus Hmoob muaj cov kev pab cuam txhais lus pub dawb rau koj. Cov kev pab thiab cov kev pab cuam ntxiv uas tsim nyog txhawm rau muab lus qhia paub ua cov hom ntaub ntawv uas tuaj yeem nkag cuag tau rau los kuj yeej tseem muaj pab dawb tsis xam tus nqi dab tsi ib yam nkaus. Hu rau 1-800-603-2340 (TTY: 711) los sis sib tham nrog koj tus kws muab kev saib xyuas kho mob."

हिंदी (Hindi)

ध्यान दें: यदि आप हिंदी बोलते हैं, तो आपके लिए निःशुल्क भाषा सहायता सेवाएं उपलब्ध होती हैं। सुलभ प्रारूपों में जानकारी प्रदान करने के लिए उपयुक्त सहायक साधन और सेवाएँ भी निःशुल्क उपलब्ध हैं। 1-800-603-2340 (TTY: 711) पर कॉल करें या अपने प्रदाता से बात करें।"

Table of Contents

ANTIVIRALS	3
CARDIOVASCULAR AGENTS	3
ELECTROLYTES/MINERALS/METALS/VITAMINS	3
NON-FRF	3
OPHTHALMIC AGENTS	5

List of Abbreviations

1: Generic: \$0, \$1.60, or \$5.10

2: BRAND: \$0, \$4.90, or \$12.65

Insulins: Important Message About What You Pay for Insulin - You won't pay more than \$35 for a one-month supply of each insulin product covered by our plan, no matter what cost-sharing tier it's on.

PDMS: Preferred diabetic medical supplies. Diabetes supplies are available through any participating pharmacy. Benefits for diabetes supplies are paid under your Part B benefit. Please refer to your Benefit Summary for additional information.

Vaccines: Important Message About What You Pay for Vaccines - Our plan covers most Part D vaccines at no cost to you. Call Customer Service for more information.

Below is a list of drug name formatting patterns that may appear in the following pages.

List of Patterns

lowercase italics: Generic drugs

UPPERCASE: Brand name drugs

Drug Name	Tier	Requirements/Limits
ANTIVIRALS		
Antiviral, Coronavirus Agents		
PAXLOVID ORAL TABLETS,DOSE PACK 150 MG (6)- 100 MG (5)	2	
CARDIOVASCULAR AGENTS		
Cardiovascular Agents, Other		
ENTRESTO ORAL TABLET 97-103 MG	2	
ELECTROLYTES/MINERALS/METALS/VITAMINS		
Electrolyte/Mineral/Metal Modifiers		
JYNARQUE ORAL TABLETS, SEQUENTIAL 15 MG (AM)/ 15 MG (PM), 30 MG (AM)/ 15 MG (PM), 45 MG (AM)/ 15 MG (PM), 60 MG (AM)/ 30 MG (PM), 90 MG (AM)/ 30 MG (PM)	2	
NON-FRF		
Non-Frf		
ACCU-CHEK AVIVA CONTROL SOLN SOLUTION	PDMS	
ACCU-CHEK FASTCLIX LANCET DRUM	PDMS	
ACCU-CHEK GUIDE GLUCOSE METER	PDMS	QL (1 EA per 365 days)
ACCU-CHEK GUIDE L1-L2 CTRL SOL SOLUTION	PDMS	
ACCU-CHEK GUIDE ME GLUCOSE MTR	PDMS	QL (1 EA per 365 days)
ACCU-CHEK GUIDE TEST STRIPS STRIP	PDMS	QL (5 EA per 1 day)
ACCU-CHEK SMARTVIEW CONTRL SOL SOLUTION	PDMS	
ACCU-CHEK SOFTCLIX LANCETS	PDMS	
CONTOUR METER	PDMS	
CONTOUR NEXT EZ METER	PDMS	
CONTOUR NEXT GEN METER	PDMS	
CONTOUR NEXT METER	PDMS	
CONTOUR NEXT ONE METER	PDMS	
CONTOUR NEXT TEST STRIPS STRIP	PDMS	
CONTOUR PLUS BLUE METER	PDMS	
CONTOUR PLUS TEST STRIP STRIP	PDMS	
CONTOUR TEST STRIPS STRIP	PDMS	
DEXCOM G6 SENSOR DEVICE	PDMS	PA; QL (0.1 EA per 1 day)
DEXCOM G6 TRANSMITTER DEVICE	PDMS	PA; QL (1 EA per 90 days)
DEXCOM G7 SENSOR DEVICE	PDMS	PA; QL (0.1 EA per 1 day)
DROPLET GENTEEL LANCING DEVICE	PDMS	
DROPLET LANCETS 30 GAUGE	PDMS	
FREESTYLE FREEDOM LITE KIT	PDMS	

Drug Name	Tier	Requirements/Limits
FREESTYLE INSULINX	PDMS	
FREESTYLE INSULINX STRIP	PDMS	
FREESTYLE INSULINX TEST STRIPS STRIP	PDMS	
FREESTYLE LIBRE 14 DAY SENSOR KIT	PDMS	PA; QL (0.08 EA per 1 day)
FREESTYLE LIBRE 2 PLUS SENSOR DEVICE	PDMS	PA; QL (0.08 EA per 1 day)
FREESTYLE LIBRE 2 READER	PDMS	PA
FREESTYLE LIBRE 2 SENSOR KIT	PDMS	PA; QL (0.08 EA per 1 day)
FREESTYLE LIBRE 3 PLUS SENSOR DEVICE	PDMS	PA; QL (0.08 EA per 1 day)
FREESTYLE LIBRE 3 READER	PDMS	PA
FREESTYLE LIBRE 3 SENSOR DEVICE	PDMS	PA; QL (0.08 EA per 1 day)
FREESTYLE LITE METER KIT	PDMS	
FREESTYLE LITE STRIPS STRIP	PDMS	
FREESTYLE PRECISION NEO STRIPS STRIP	PDMS	
FREESTYLE TEST STRIP	PDMS	
GLUCOCARD EXPRESSION	PDMS	
GLUCOCARD EXPRESSION KIT	PDMS	
GLUCOCARD EXPRESSION STRIP	PDMS	
GLUCOCARD SHINE CONNEX METER	PDMS	
GLUCOCARD SHINE EXPRESS METER	PDMS	
GLUCOCARD SHINE METER	PDMS	
GLUCOCARD SHINE METER KIT KIT	PDMS	
GLUCOCARD SHINE TEST STRIPS STRIP	PDMS	
GLUCOCARD SHINE XL METER	PDMS	
GLUCOCARD VITAL KIT	PDMS	
GLUCOCARD VITAL SENSOR STRIP	PDMS	
MICROLET LANCET	PDMS	
MICROLET NEXT LANCING DEVICE KIT	PDMS	
OMNIPOD 5 (G6/LIBRE 2 PLUS) SUBCUTANEOUS CARTRIDGE	PDMS	PA; QL (0.5 EA per 1 day)
OMNIPOD 5 INTRO(G6/LIBRE2PLUS) SUBCUTANEOUS CARTRIDGE	PDMS	PA; QL (0.5 EA per 1 day)
ONETOUCH DELICA PLUS LANCET 30 GAUGE, 33 GAUGE	PDMS	
ONETOUCH ULTRA TEST STRIP	PDMS	QL (5 EA per 1 day)
ONETOUCH ULTRA2 METER	PDMS	QL (1 EA per 365 days)
ONETOUCH ULTRASOFT 2 LANCET 30 GAUGE	PDMS	
ONETOUCH VERIO FLEX METER	PDMS	QL (1 EA per 365 days)
ONETOUCH VERIO REFLECT METER	PDMS	QL (1 EA per 365 days)

Drug Name	Tier	Requirements/Limits
ONETOUCH VERIO TEST STRIPS STRIP	PDMS	QL (5 EA per 1 day)
PRECISION XTRA MONITOR	PDMS	
PRECISION XTRA TEST STRIP	PDMS	
RENTHYROID ORAL TABLET 120 MG, 15 MG, 30 MG, 60 MG, 90 MG	1	
TECHLITE PLUS PEN NEEDLE NEEDLE 32 GAUGE X 5/32"	PDMS	
TRUE METRIX AIR GLUCOSE METER	PDMS	
TRUE METRIX GLUCOSE METER	PDMS	
TRUE METRIX GLUCOSE TEST STRIP STRIP	PDMS	
UNIFINE SAFECONTROL PEN NEEDLE NEEDLE 31 GAUGE X 1/4", 31 GAUGE X 3/16", 31 GAUGE X 5/16"	PDMS	
OPHTHALMIC AGENTS		
Ophthalmic Intraocular Pressure Lowering Agents, Other		
<i>pilocarpine hcl ophthalmic (eye) drops 1.25 %</i>	1	

Index

ACCU-CHEK AVIVA		FREESTYLE LIBRE 2		ONETOUCH VERIO	
CONTROL SOLN.....	3	READER.....	4	REFLECT METER.....	4
ACCU-CHEK FASTCLIX		FREESTYLE LIBRE 2		ONETOUCH VERIO TEST	
LANCET DRUM.....	3	SENSOR.....	4	STRIPS.....	5
ACCU-CHEK GUIDE		FREESTYLE LIBRE 3 PLUS		PAXLOVID.....	3
GLUCOSE METER.....	3	SENSOR.....	4	<i>pilocarpine hcl</i>	5
ACCU-CHEK GUIDE L1-L2		FREESTYLE LIBRE 3		PRECISION XTRA	
CTRL SOL.....	3	READER.....	4	MONITOR.....	5
ACCU-CHEK GUIDE ME		FREESTYLE LIBRE 3		PRECISION XTRA TEST.....	5
GLUCOSE MTR.....	3	SENSOR.....	4	RENTHYROID.....	5
ACCU-CHEK GUIDE TEST		FREESTYLE LITE METER.....	4	TECHLITE PLUS PEN	
STRIPS.....	3	FREESTYLE LITE STRIPS.....	4	NEEDLE.....	5
ACCU-CHEK SMARTVIEW		FREESTYLE PRECISION		TRUE METRIX AIR	
CONTRL SOL.....	3	NEO STRIPS.....	4	GLUCOSE METER.....	5
ACCU-CHEK SOFTCLIX		FREESTYLE TEST.....	4	TRUE METRIX GLUCOSE	
LANCETS.....	3	GLUCOCARD		METER.....	5
CONTOUR METER.....	3	EXPRESSION.....	4	TRUE METRIX GLUCOSE	
CONTOUR NEXT EZ		GLUCOCARD SHINE		TEST STRIP.....	5
METER.....	3	CONNEX METER.....	4	UNIFINE SAFECONTROL	
CONTOUR NEXT GEN		GLUCOCARD SHINE		PEN NEEDLE.....	5
METER.....	3	EXPRESS METER.....	4		
CONTOUR NEXT METER.....	3	GLUCOCARD SHINE			
CONTOUR NEXT ONE		METER.....	4		
METER.....	3	GLUCOCARD SHINE			
CONTOUR NEXT TEST		METER KIT.....	4		
STRIPS.....	3	GLUCOCARD SHINE TEST			
CONTOUR PLUS BLUE		STRIPS.....	4		
METER.....	3	GLUCOCARD SHINE XL			
CONTOUR PLUS TEST		METER.....	4		
STRIP.....	3	GLUCOCARD VITAL.....	4		
CONTOUR TEST STRIPS.....	3	GLUCOCARD VITAL			
DEXCOM G6 SENSOR.....	3	SENSOR.....	4		
DEXCOM G6		JYNARQUE.....	3		
TRANSMITTER.....	3	MICROLET LANCET.....	4		
DEXCOM G7 SENSOR.....	3	MICROLET NEXT LANCING			
DROPLET GENTEEL		DEVICE.....	4		
LANCING DEVICE.....	3	OMNIPOD 5 (G6/LIBRE 2			
DROPLET LANCETS.....	3	PLUS).....	4		
ENTRESTO.....	3	OMNIPOD 5			
FREESTYLE FREEDOM		INTRO(G6/LIBRE2PLUS).....	4		
LITE.....	3	ONETOUCH DELICA PLUS			
FREESTYLE INSULINX.....	4	LANCET.....	4		
FREESTYLE INSULINX		ONETOUCH ULTRA TEST.....	4		
TEST STRIPS.....	4	ONETOUCH ULTRA2			
FREESTYLE LIBRE 14 DAY		METER.....	4		
SENSOR.....	4	ONETOUCH ULTRASOFT 2			
FREESTYLE LIBRE 2 PLUS		LANCET.....	4		
SENSOR.....	4	ONETOUCH VERIO FLEX			
		METER.....	4		

Caafimaad Loo Wada Siman Yahay

Waxaan naga go'an inaan si wadajir ah ula shaqayno bulshooyinka aan u adeegno, aan barano caqabadaha gaarka ah ee daryeelka caafimaadka, oo aan abuurno xalal muuqda oo la taaban karo si aan uga dhigno daryeelka caafimaadka mid loo wada siman yahay oo si fudud loo heli karo.

Waxaan u joognaa inaan ku caawinno.

Liiskan daawooyinka caymisku daboolo waxaa la cusboonaysiiyay taariikhda 09/02/2025. Haddii aad qabto wax su'aalo ah, fadlan ka wac Providence Medicare Advantage Plans lambarka 503-574-8000 ama 1-800-603-2340. Isticmaalayaasha TTY waa inay wacaan 711. Waxaan furnahay toddoba maalmood usbuucii, inta u dhaxaysa 8 subaxnimo iyo 8 galabnimo (Waqtiga Baasifigga). Inta u dhaxaysa 1da Abriil ilaa 30ka Sebteembar waxaanu xirannahay Sabti iyo Axad kasta, ama booqo [ProvidenceHealthAssurance.com](https://www.ProvidenceHealthAssurance.com).